

## Vårdval Kronoberg – marka dadka deegaanka ahi dooranayaa xaruntoodaa caafimaadka

Waxa ay Vårdval Kronoberg ka dhigantayah in aad adigu hadaad deegan ku tahay degmada Kronoberg aad dooran karto xarunta caafimaadka aad rabto. Dhamaan dadka deeganka ah waxa ay heli doonaan xarunta caafimaadka ay iyagu doortaan, iyada oo Xarunaha caafimaadku uu wax qabadkooda ku salaysnaan doono inta qof ee soo dalbata. Liistada Xarunaha caafimaadka ee aad dooran karto waxa aad ka arki kartaa boga xarunta dawlada hoose, [www.ltkronoberg.se/vardval](http://www.ltkronoberg.se/vardval).

### Sidee ayaan u dalbanayaa?

Marka aad doonto ayaad dooran kartaa xarunta caafimaadka adiga oo hadii aanad ku qanacsaneyn doorashadaada mid kale dooran kara. Doorashada waxa aad ku sameynaysaa qoraal adiga oo buuxinaaya foom aad ka soo qaadan karto boga xarunta dawlada hoose [www.ltkronoberg.se/vardval](http://www.ltkronoberg.se/vardval), ama waxa aad ka soo qaadan kartaa Xarunaha caafimaadka ama ka dalban kartaa xarunta adeega caafimaadka oo telefoonkoodu yahay 0470 58 96 60. Ma u baahnid in aad soo buuxisid foomka dalbshada, hadii aad ku qanacsan tahay xarunta caafimaadka ee dhawaansho ahaan awgeed laguugu qoray.

### Afar qodob oo aasaasi u ah

Vårdval Kronoberg waxa ay ku dhisan tahay afar qodob oo aasaasi ah.

- Doorasho xor ah – Dadka deeganka degmada ku ah waxa ay fursad u helayaan in ay doortaan xarun caafimaad ee ka dabooli karta baahida aasaasiga u ah ee caafimaadka guud iyo daaweyntoodba. Xarunaha caafimaadku waa in ay qaabilaan dadka bukaan-socodka ah oo ay wax qabadkoodana ku saleeyaan taas.
- Helitaanka – Si ka dhib yar ayaa loola soo xidhiidhi doona adeega caafimaadka. Mawqifku waa in la gaadho heer helitaan oo ka sareeya ka hada uu daryeelka caafimaadku uu dhigaayo. Waxa kale oo ay taasi ka dhigan tahay in ay dhib yaraato sida wakhti loo qabsado ama ay xarunta caafimaadku qorshayso xiliyada furitaanka oo ka duwan kuwa hada jira.
- Kala-duwanaa – Ujeedayadu waa sidii aanu ugu dadaali laheyn in dadka deeganka ah ay helaan xarumo kale oo ka duwan kuwa hada jira.
- Xadeynta qiimaha – Hab waa in loo dajiyo si ay u suurto gasho sidii xadeynta qiimaha kor loogu qaado..

### Xarunaha caafimaadka ogolaanshah haysta

Xarunaha caafimaadka ee ka tirsan Vårdval Kronoberg waxa looga baahan yahay in ay dawlada hoose ee Kronoberg ogolaansho ka haystaan. Si ay ogolaanshahaa u qaataan waa in ay bixiyaan shuruudaha aasssaiga ah ee ay go'aamisay dawlada hoose kuwaas oo ay ka mid yihiin adeegyada caafimaadka ee daruuriga ah, talo-bixinta, arimaha ka hortaga khuseeya, baanashada, xanaanada caafimaadka xaruurta iyo aqoonta cudurada maskaxda. Xarunta caafimaadku waa in ay raacdo shuruudaha iyo xeerarka caafimaadka iyo daaweynta, in ay lahaadaan xirfad badan si ay u bixiyaan daryeel aad u heer sareeya. Xarun caafimaad oo ogolaansho haysata waxa aad ku garanaysaa astaanta calaamada ay Vårdval Kronoberg ku taalo.

## **Xirfad gaar ah**

Dhamaan shaqaalaha caafimaadka iyo daawayntu waa in ay haystaan diiwaan galin iyo xirfada gaarka ah. Xarun caafimaad kasta waa in ugu yaraan 75 % ay dhakhaatiirta ka shaqeeyaa ahaadaan qaar ku takhasusay cudurada guud iyada oo ugu yaraan 50 % ay kalkaalisoooyinku ahaadaan qaar si gaara ah loo tabo baray oo kalkaalisoooyinka degmada ah.

## **Dhaqaalaha caafimaadka iyo daawayntu**

Iyada oo loo eegaayo doorashada caafimaadka ee dadka deegaanka ah ayaa waxa xarun caafimaad kastaa dawlada hoose dhaqaale kaga helaysaa qofkasta oo isku soo qora. Dhaqalaha oo loogu yeedho dhaqaalaha caafimaadka iyo daawayntu, waxa uu ku xidhan yahay da'da dadka deegaanka ah. Dadka bukaan- socodka ahi waxa ay bixinayaan lacag isku mid ah dhamaan xarunaha caafimaadka ee ka midka ah Vårdval Kronoberg. Sharciyo isku mid ahna waa ay wada khuseeyaan dhamaan kaadhka lacagta ugu badan ee la bixiyo lagu qaato iyo kaadhka caafimaadka lacag la'aant ah.

## **Dabagal ku sameyn**

Dawlada hoose ayaa dabagal ku sameyn doonta shaqada si loo hubiyo in dhamaan xarunaha caafimaadku ay raacayaan hab dhaqameedkii loo dajiyay iyo shuruudihii. Hadii ay xarun ka mid ahi buuxin waydo shuruudahaa waxa ay dawlada hoose ka goosan doontaa dhaqaalaha caafimaadka iyo daawaynta.



*Astaanta calaamada tusaysa in xarunta caafimaadku ay ogolaansho dawlada hoose ee Kronoberg ka haysato.*